

## Hubinta Fiicnaanta Fasal kastaba

### Dul-marka Guud

Fasalada waa muhiimada koowaad shaqadayna, iyo macalimiinta iyo shaqaalaha waa in ay helaano wax-barida oo leh qalabka ay u baahan yihiin si loo hubiyo dhamaan ardayna, fasal kastaba ee degmada waa in ay helaano tayo wax barid sare si loo gaaro guulaha.

Ardaydayna waxay u baahan yihiin hab cad, manhaj ku saleysan heerka aqoonta kana baahasan dhamaan dugsiyada, una diyaarinaayo xirfada mustaqbilka nolosha ka dambeeyso ka qalin-jabinta dugsiga sare; macalimiinta iyo shaqaalaha wax-barida waxay u baahan yihiin macluumaadka heerka ardayda si loo aqoosado meela ardayda ku fiican yihiin ama meelaha ku liitaan; qaabka dugsiyadeeyna waxay u baahan yihiin caawinaad, fara-galin iyo madax-banaanin qorshadooda iyo in oo la kulmaan baahida ardayda.

### Qodobada Muhiimka ah

Waxaa jira qaybo fara badan aynu ahmiyada-saareeyno sanadkaan.

**Manhaj Ku Toosan ama Raacsan Xisaabta iyo Sayniska** – Ardaydayna waxay horumar ka sameenayaan akhriska iyo qoritaanka iyadoo ay ahmiyada ay siiyeen suugaanta, Hadda waxaa xooga la saarayaa xisaabta iyo sayniska. Xiligaan, arday yar ayaa si hagaasan u garaneeyso xisaabta iyo sayniska. Waxaynu dhisaynaa cilmiga aqoonta xisaabta iyo sayniska si aynu u hubino in ardaydana dugsiga ugu qalin-jabiso xirfa iyo aqoonta ay ugu guulaysan lahaayen doorashada xirfada mustaqbilkooda dambe. Manhajka raacsan xisaabta iyo sayniska kaliyah ma xoojinaayo aqoonta fasalka ee wuxuu hubinayaa in oo dhiso casharada heer kastaba fasalada sanadka ka horeeyo. Manhajkaan wuxuu degmada ka cawinayaa in la helo bartil-maadeed lagu gargaaraayo macalimiinta iyo maamulka dugsiyada – iyadoo laga rajeenaayo aqoon la-wadaago fasal ilaa fasala kale, dugsi ilaa dugsiga kale, maamulka degmada waxay si haboon xooga u saarayaan bixinta xirfada aqoonta shaqaalaha u baahan yihiin.

**Helitaanka Heerka Macluumaadka Ardayda** – Macalimiintayna iyo shaqaalaha gargaaro wax barida si joogta ah, waxay u codsadaan heerka macluumaadka ardayda si ay u ogaadaan halka ardyga ku fiican yahay ama ku liido si ay ugu cawinaan una siiyaan qaabka wax barida ku hoon ardayda. Waxaynu si gaar ah ula shaqayneeyna macalimiinta iyo maamulayaasha dugsiyada si ay u soo horumariyaa qiimeynta ardayga, taas oo macalimiinta iyo shaqaalaha gargaaro wax barida u helaano natiijada dhabta ah iyo ra'yi-celinta horumarka ardayga.

**Hirgalinta Qaab-Dhismeedka Wax-qabadka Dugsiga** – Inta badan dugsiyada waxay ku guulaysteen waxbrashada laakiin dugsi kastaba wuxuu u baahan yahay hagaajin. Hirgalinta qaab-dhismeedka wax-qabadka dugsiga waxaa lagu cadeynayaa dugsi kastabada halka oo ku fiican yahay iyo halka ugu baahan yahay cawinaada, gargaarka dugsiga la siinaayo waxay ku xiran tahay xaaladaha oo dugsiga ku sugan yahay. Waxaynu si gaar ah ula shaqayneeynaa macalimiinta, maamulayaasha dugsiyada iyo shaqaalaha kale si loo soo bandhigo horumarint ku saleysan macluumaadka sanad dugsiyeedka 2008-09, taas waxay u sii hogaysaa sanad dugsiyeedka 2009-10.

### Su'aaladaha Ururada

- Maxaa rabtaa in aad si fiican u barato?
- Maxaa kuu cadeeyn?
- Maxaa anaga naga maqan?
- Sidee baa u jeceshahay in lauguu siiyo akhbaaraha aad ugu qaybgalayso shaqadaan?